toban aayadood, mana ay qaadan jirin tabanka kale ilaa ay bartaan waxa ku jira ee cilmi iyo camalba ah

Abii Cabdiraxmaan Asulami Allaha u naxariistee waxaa laga wariyey inuu yiri: Wuxuu noo sheegay mid noo akhrin jiray oo asxaabta Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, ka mid ahaa, asxaabtu waxay Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka akhrisan jireen toban aayadood, mana ay qaadan jirin tabanka kale ilaa ay bartaan waxa ku jira ee cilmi iyo camalba ah, waxay yiraahdeen: waan baranay cilmigii iyo camalkiiba.

[Xadiis Xasan ah] [Waxa wariyay Axmed]

Asxaabtu Allaha ka raali ahaadee waxay Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka qaadan jireen toban Aayadood oo Quraanka ah, wax kale ma ay qaadan jirin ilaa ay bartaan waxa ku jira tobankaa ee cilmi ah kuna camal falaan, markaasay cilmigii iyo camalkiiba isla heleen.`

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/65058